



## Dabeecada ardeyga

### Warqada xaqiiqda waalidka/xannaaneeyaha

#### Dabeecada

Waxaan dooneynaa inaan hubino in dugsi ugu noqdo amaan iyo mid farxad u leh ilmahaaga. Taageerida dabeecada ardeyga waa u muhiim in kor loo qaado, hawlgelinta iyo kor u qaadista waxqabadka ardeyga iyo faydaqabkiisa. Dugsiyadu waxa qasadkoodu yahay inay siiyaan jawi waxabarsho dhammaan oo ah mid iskaashi leh, wax taageera oo isku xirnaan leh. [Xeerka Bulshada Dugsiga](#) ayaa sharxaya sida tani ugu muuqato waalidiinta, xannaaneeyayaasha, barayaasha iyo shaqaalaha dugsiga.

#### Istiraatiijiyada Dabeecada Ardeyga

Istiraatiijiyada Dabeecada Ardeyga ([Student Behaviour Strategy](#)) waxay caawisaa dhisida nidaam waxbarasho oo dhammaan lagu wada jiro halkaas oo ardey kasta la yaqaan, qiimeeyo oo daryeelo, iyo dhammaan ardeydu ay wax ku baran karaan awoodooda buuxda. Waxaan ognahay in ardeyda dareemeysa in la taageerayo amaana yihiin inay aad ugu dhow yihiin ku xirnaanta dugsiga oo ay noqdaan ka qaybgalayaal firfircoon waxbarashadooda.

Jewiyada waxbarashada xushmada badan waxay kor u qaadaan, faydaqabka, hawlgalka iyo waxbarashada halka ardeygu gaaro oo hagaagta. Istiraatiijiyadu waxay taageertaa talaabada bulshada-qoyska-iyo dugsiga wanaagsan, ee ardaygu yahay midka xoogga la saarayo, oo joogteyntu ay tahay furaha. Baahida dhammaan ardeyda waxaa fulinaya Daryeelka joogta ah ([Care Continuum](#)).

#### Koodhka Dabeecada Ardeyda

Koodhka Dabeecada ardeyda ([Behaviour Code for Students](#)) wuxuu sharxayaa dabeecada laga filayo dhammaan dugsiyada dadweynaha ee NSW. Dugsiga ilmahaaga wuxuu sidoo kale sameyn doonaa dabeecadaha la rabo ee dugsigooda laga filayo. Shaqaalaha dugsiga ilmahaaga ayaa bari doona oo aqoonsan doona dabeecada laga filayo.

#### Dabeecada la saluugayo

Carruurta iyo dadka waa weyn ee dhalinta yar waxay muujin karaan dabeecado adag wakhtiyada qaarkood oo ah qayb caadi ah oo ka mid ah koritaanka. Waxaa laga yaabaa in ilmahaaga ay saameysay dabeecada kuwa kale ama dabeecadoodu ay saameyso kuwa kale. Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan [waxaad sameyn lahayd haddii ilmahaagu uu kuu sheegay wax ku saabsan arimaha dabeecadaha dugsiga](#) waxaa laga helayaa website ka.

#### Wixii macluumaad dheeraad ah

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ogaatid wax badan oo ku saabsan [taageerada dabeecada](#) ama aad qabto wax saluug ah oo ku saabsan dabeecada ilmahaaga fadlan la xiriir dugsiga.

#### Adeega turjumaanka taleefanka

Haddii aad dooneysid inaad la xiriirtid dugsiga oo aad caawimaad uga baahan tahay Ingiriiska fadlan ka wac adeega turjumaanka taleefanka 131 450, u sheeg luuqadaad u baahan tahay oo weydii xiriiriyaha inuu waco dugsiga. Xiriiriyaha ayaa turjumaan khadka soo gelin doona kaa caawiya wada hadalkaaga. Adeegan lacag lagaama qaadi doono.